

Sharciyo cusub ee jidadka laga bilaabo 27ka Febraayo

Laga bilaabo 27ka bisha Febraayo ee 2005, waxaa lasoo rogay sharci cusub si laguugu caddeeyo waxaad yeelayso markaad marayso khadadka cadcad ee dadka lugaynaya jidka ka gooyaan, laymanka gaadiidka gaarka ah (sida kuwa baaskiilada iyo basaska) iyo roonabawtyada (siiba kuwa leh laymanka badan).

Fadlan si feejigan u deris akhbaarta soo socota – oo hubi inaad fahamtay waxa lagaa doonayo inaad samayso.

Halka dadka lugaynayaa jidka ka gooyaan

Darawaliintu waa inay jidka siiyaan (ka joogsadaan) dadka ka tallaabaya waddada labadeeda dhinacba, haddii halka laga tallaabay aynan kala qaybin meel bannaan oo kor u kacsan.



Laymanka gaadiidka gaarka ah (kuwa basaska iyo baaskiilada)

Dadka baaskiilada saaran uunbaa loo oggolyahay isticmaalka laymanka baaskiilada.

Dadka baaskiillada wata, kuwa mootooyinka wata iyo basaska uunbaa loo oggol yahay laymanka basaska.

Waad goyn kartaa laynka gaadiidka gaarka ah si aad u leexato ama u (baarkingarayso) gaarigaaga meel ka baxsan laynka. Waxaase lagaa rabaa inaad jidka siiso gaadiidka xaqa u leh isticmaalka laynkaas.

Lama istaagi karo, gaarina lama dhigan (baarkingarayn) karo laynka gaadiidka gaarka ah (haddaan calaamadaha jidku fasixin).



Roonabawtyada (Wareegyada) jidadka

Intaadan soo gelin roonabawtyada - waa inaad tilmaantaa inaad bidix ama midig uga baxayso – haddaad toos usoconayso, se tilmaan ha bixin.

Markaad roonabawtyada gelayso, waa inaad waddada siisaa dhammaan gaadiidka midigta kaa xiga ee marinkaaga kusoo beegan.

Dabadeed waa inaad tilmaan bidix u ridato markaad ku beegan tahay illinkaad ka baxayso kan ka horreeya.

Roonabawtyada laymanka badan, waa inaad wareegga kasoo abbaarto oo ka gasho laynka saxa ah ee ku beegan dhankaad ka baxayso.

Sida loo fulin karo:



Haddaad gaadhayn bartamaha roonabawtyada, waa inaad raacdaa laynka bidix (ama laykii kale ee loogu talo galay), oo aad isla markaana shidato tilmaanta leexashada bidix intaadan gelin wareegga. Hajoojin tilmaanta bidix intaad ka baxayso wareegga.



Haddaad toos u baxayso (gaarayso badhtamaha roonabawtyada) waa inaad raacdo laynka loogu talo galay. Waa inaad tilmaanto leexasho bidix markaad ku began tahay dhankaad ka baxayso kan ka horreeya.



Haddaad gudbayso badhtamaha roonabawtyada layman badan leh, waa inaad isku soo beegto laynka midig (ama laynkii kale ee loogu talo galay). Waa inaad sidoo kale ridato tilmaan leexasho midig markaad wareegga soo gelayso. Dabadeedna tilmaan leexasho bidix markaad ku beegan tahay dhankaad ka baxayso kan ka horreeva.

Inaad dhowrto una hoggaansanto sharciyadan sahlan ee ku saabsan halka dadka lugta ahi waddada ka gooyaan, laymanka gaadiidka gaarka ah iyo wareegyada jidadku, waxay gacan ka geysanaysaa ammaanka waddooyinka iyo badbaadada cid walba.

Akhbaar dheeraad ah oo la xiriirta arrimahaas ama isbeddello kaleba, fadlan wac 0800 822 422 ama eeg bogga internerka www.landtransport.govt.nz